

Heshiiska ayaa markii ugu horreysay la saxiixay 6 Febraayo 1840. Waxaa lagu qoray luqadda Maori, magaceedana waa **Te Tiriti o Waitangi**. Waa kuwan qodobdadii ugu waaweynaa ee lagu heshiiyey, oo ah afka Soomaaliga.

SOO KOOBIDA HESHIISKA WAITANGI

HORDHAC

Boqoraddu waxay doonaysaa in madaxda Maori iyo quruumaha New Zealand ay ilaashadaan dhulkooda iyo madax-banaanidooda, waxayna doonaysaa in dhammaan ay nabad ku wada noolaadaan. Heshiisku waa in dadkeeda hadda jooga New Zealand iyo kuwa mustaqbalka iman doona loo sameeyo guddoomiye.

SADEXAAD

Boqoraddu waxay daryeeli doontaa dadka Maori waxayna siin doontaa xuquuq la mid ah tan dadka Ingiriiska.

KOOWAAD

Hogaamiyayaasha Maori ayaa siinaya boqorada Ingriiska waligeed xaqa ay u leeyihiin in ay gudoomiye ku yeeshaan dhulkooda.

LABAAD

Boqoradu waxay ogolaatay in Maori ay ilaashadaan madax banaanidooda iyo madax banaanida dhulkooda oo dhan iyo wax kasta oo iyaga muhiim u ah. Hogaamiyayaasha Maori waxay u ogolaadeen boqorada inay haysato qaybo dhul qiimo lagu heshiiyey hadii mulkiiluhu rabo inuu bixiyo.

AFARAAD

(BALLANQAADKA HADALKA)

Guddoomiyuhu waxa uu ballan qaaday in uu ilaalinayo dhaqanka Maori iyo dhammaan diimaha New Zealand.

